



Xarunta
Wanaajinta ee
Afrikaanka
Maraykanka

SOMALI

P.O. Box 25339, Seattle, WA 98165-2239

Tel: 206-925-4800

www.cwaaUSA.org

Julayo 31, 2008

Waalidka Qaaliga,

Xarunta Wanaajinta ee Afrikaanka ku dhaqan Maraykanka(XWAM) iyoXafiiska u qaabilsan Iskuulada Dowlada ee Seattle xaga Iskaashiga qoysaska iyo jaaliyadaha(XIQJ) ayaa marti qaad u samaynaya waalidiinta ka yimi Bariga Afrika ee leh caruurta gaadhay waqtiga iskuulka sidii ay uga qayb qaadan munaaqisho dhexmaraysa jaaliyada. Waxan xiisaynaynaa in helno aan khibrada waalidinta caruurta leh. Wadahadaladan waxay dhexmarayaan koox waalidiin ah oo ka kooban 8 ilaa 10 qof oo loogu yeedho Kooxda Aqoon-iswaydaarsiga.

Ujeedada Kooxdan waa in soo ururiyaan akhbaaraha si aan u lehno fahmo munaasib oo ku saabsan khibradooda iyo dufuuraha adag ee ay kala kulmeen Maraykanka. Waxaan rajeynaynaa wararka aan helno in ay naga caawimayaan samaynta barnaamij ku haboon waalidiinta korinaya caruurta si ay uga gudbaan caqabadahaas. Akhbaarta aad na siiso waa maalgelin aad ugu fiican waalidiinta iyo caruurta jaaliyada jiilka hada iyo ka soo socdaba. Shaqaale loo carbiyey sidii ay hagi lahaayeen aqoon-kororsigan oo ku hadlaya luqadaada ay kuu diyaar ah.

Hadii aad go'aansatid in aad ka qayb gasho daraasadan, waxaad ku biiraysaa koox waalidiin ah oo ka kooban ilaa 10 qof, shirkuna waxa uu qaadanayaa saacad ilaa saacad iyo badh. Hogaamiyayaasha kooxda waxay weydiinayaan Kooxda waalidiinta ah su'aalo ku saabsan khibradooda barbaarinta ubadka adigoo shirka ku jiraya inta aad doonta oo aanay khasab ahayn in aad shirka dhamayso. Wadahadalka waa la duubayaa si aan u hubino In aan qorno dhamaan talo bixinta waqtiga shirka lagu jiro. Waxaan isticmaalaynaa magaca hore keliya inta lagu jiro munaaqishada mana jiri doonto magacyo la diiwaan gelinayo oo la hayn doona daraasada ka dib. Kumana lifaaqayno magacyadooda shakhsiyadka talo-bixinta dhiibtay. Waxaam taas ku bedelanaynaa in aan qorno talooyinka keliya oo aan wax maqac ah la socon.

XWAM iyo XIQJ ayaa go'aaminaya qiimaynta daraasada waxayna la hadhayaan khibradaha waalidiinta macquulka ee ku jira waalidiinta Bariga Afrika. Waxaan rumaysanahay hadii la wadaago khibrada , waxan awoodnaa in aan garan karno dulucda dhaqanka ee la wada wadaago taasina waxay noo fududaynaysaa in xal la helo. Waxaan bixinaynaa lacag dhiiri-gelin oo aan siinayno qofkii ka qaby-qaata cilmi-kororsigan.

Hadii aad xiisaynayso ka qayb-galkanka shirkan , fadlan la soo xidhiidh telefoonka Caroline oo ah 206-234-4837 ama Linda Slater oo telefoonkeedu yahay 206-252-0992. Ka soo qayb-galkaadu aad ayuu muhiim noogu yahay waxaana rajeynaynaa in aad nagu soo biirto.

Daacadnimo,

Caroline Sawe